



## KU FARAHSANNAHAY INNAN TAJANNO

**Miyaad taqaannaa qof ay ku adagtahay isku afgarashada luqadda Ingriiska?** Miyeey tani ka horistaagtaa helidda warbixinta ama adeegga ay u baahan yihiin? Waxaa suurtoowda in aysan ku faraxsaneyn iney isku halleeyaan qoys ama saaxiibbo xagga ka caawinta is-afgarashada? **Haddey sidaa tahay Hindisaha Logo-ha (logo waa magac ama calaamad shirkad) ee “Waan ku Faraxsanahay inaan kuu Turjumo” ujeeddadeedu waa inay ku caawiso!**

### WAA MAXAY LOGO-HA “WAAN KU FARAXSANAHAY INAAN KUU TURJUMO”?

Logo-ha “Waan ku Faraxsanahay inaan kuu Turjumo” waxay u taagan tahay is afgarasho lagu guuleysto oo ka dhex dhacda labo qof oon luqad wadaagin. Sawirka waxaa lagu doortay cod badan ra’yi-baaris laga qaaday bulshooyin kala duwan ee Skotland. Tallaabadaan waxaa loo horumarinayaa si loogu caawiyo in la sii hagaajiyo tayada nololsha dadka Skotland ee in yar ku hadla ama akhriya amaba aan ku hadlin Ingriisiga ama isticmaala luqad aan hadal ahayn. Ururrada muujiya Logo-ha waxay bixin doonaan kaalmo xagga luqadda oo ah qaab turjumad qoraal ah iyo turjumad qarsoodi ah.

### WAA MAXAY TURJUMAD QORAAL AH IYO TURJUMAD AFKA AH?

**Turjumad qoraal ah** - erayo qoran ayaa luqad laga beddelaa oo loo beddelaa mid kale. **Turjumad Afka ah** - labo qof ama ka badan oo aan isticmaalin isku luqad ayaa isafgarta iyadoo uu caawinayo qof saddexaad oo isagu labada luqadood si fiican ugu hadla. Xirfadleyaal turjubaanno qoraal iyo turjubaanno afka ah waa khubaro luqad oo leh tababar khaas ah. Waxay u hoggaansan yihiin qaanuun dhaqan habboon iyo heer tayo sare oo xaqiijiya in shaqadoodu noqoto sax, eex la’aan, mid xil layska saaro qarsoodina ah. Qaar waxay ku takhasusaan luqad farsamo ah oo loo isticmaalo laamo cilmi ah sida sharciga ama daawada.

### SEE BUU LOGO-HA “WAAN KU FARAXSANAHAY INAAN KUU TURJUMO” KUU CAAWIN KARAA?

Markii uu macmiil inyar oo Ingriis ah ku hadla ama akhriya ama waxba ka aqoon uu booqdo Ururka Logo-ha “Waan ku Faraxsanahay inaan kuu Turjumo” xubin

## SOOMAALI

### SOMALI

shaqaalaha ka mid ah ayaa qaadi doonta tallaabooyin fudud si ay u xaqiijiso luqadda uu macmiilku doorbido inuu isticmaalo iyo warbixinta ama adeegga ay u baahan yihiin. Tan waxaa ka mid noqon karta iyadoo la weydiiyo macmiilka inuu farta kaga fiiqo luqaddiisa xaashi luqado ku qoran yihiin, ama la isticmaalo adeeg luqad ee telefoon. Mar haddii la xaqiijiyo luqadda iyo baahida, ballan baa macmiilka loola qabanayaa tuurjubaan xirfadle ah, ama in dokumentiyo loo tarjamo luqadda ku habboon (dibudhaca waa la yareynayaa haddii loo baahan yahay caawinaad xaalad degdeg ah).

#### GORMAA & XAGGEE LAGA HELAA ADEEGYADAAN?

Dhowr ururro dadweyne ayaa horseedaya Logo-ha “Waan ku Faraxsanahay inaan kuu Turjumo” ee 2005-07. Kooxda kowaad waxaa ka mid ah qaybo laga dhex xulay **Golaha Magaalada Edinburgh, Booliska Lothian iyo Borders, Golaha Moray, NHS Lothian, iyo Wakaaladda, Ururrada Guriyeynta Hanover (Skotland) & Bield** (ururro horseed ah oo dheeraada waa lagu dhawaaqi doonaa). Marka la soo gabagabeeyo heerka horseedka ah, ururrada kale waxaa lagu dhiirrigelin doonaa inay codsadaan xubinnimo si ay u isticmaalaan Logo-ha “Waan ku Faraxsanahay inaan kuu Turjumo”. Waxa la rajeynayaa in muddo gudaheed, Logo-ha ay si ballaaran u isticmaali doonaan ururrada dadweyne iyo kuwa gaar-ahaaneed ee Skotland si loo sii horumariyo fursad u helidda warbixinta iyo adeegyada.

#### WARBIXIN DHEERAAD AH

Haddaad taqaan qof ka faa'iideysan kari lahaa Logo-ha “Waan ku Faraxsanahay inaan kuu Turjumo”, fadlan la wadaag warbixintaan iyaga. Ku saabsan turjumad qoraal ah ee luqado dheeraada ama qaabab beddelkood ah (sida Braille (farta dadka indhoolaha ah), cajalad dhegeysi ama dabacaad waaweyn) fadlan wac 0131 444 4951 ama u qor: Logo-ha “Waan ku Faraxsanahay inaan kuu Turjumo”, 12 New Mart Road, Edinburgh EH14 1RL Buuggaan waxaa kaloo laga daawan kara internetka ee [www.happytotranslate.com](http://www.happytotranslate.com).

**Horumarinta adeegsiga loo siman yahay  
ee looga gudbayo caqabadaha luqadda**